

## **Afeef**

Foomka Qiyaasta Qiimaha wuxuu muujiyaa kharashyada alaabta iyo adeegyada sida macquulka ah looga filayo inay gacan ka geysanayaan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka. Qiyaasta waxay ku salaysan tahay macluumaadka la oгаа wakhtiga qiyaasta la sameeynayay.

Foomka Qiyaasta Qiimaha kuma jiraan wax kharashyo ah oo aan la garanayn ama la filanayn oo soo shaac bixi kara inta lagu jiro daawaynta. Waxaa lagugu soo dallaci karaa lacag intaas ka badan haddii dhibaatooyin ama xaalado gaar ah soo baxaan. Haddii taasi ay dhacdo, sharciga federaalka wuxuu kuu ogolaanayaa inaad ka doodo (rafcaan ka qaadato) biilka.

## **Haddii lagugu soo dallaco lacag ka badan qiimaha ku yaala Foomka Qiyaasta Qiimaha, waxaad xaqa u leedahay inaad ka doodo biilka.**

Waxaad la xiriiri kartaa daryeel-bixiyaha caafimaadka ama xarunta caafimaadka ee liiska ku qoran si aad u ogaysiiso in kharashaadka lagugu soo dalacday ay kasarreeyaan qiimaha ku qoran Foomka Qiyaasta Qiimaha. Waxaad ka codsan kartaa inay cusboonaysiiyaan biilka si ay u waafajiyaan Foomka Qiyaasta Qiimaha, waxaad ka codsan kartaa inaad kala xaajooto biilka, ama waxaad weydiin kartaa haddii ay jirto kaalmo maaliyadeed oo la heli karo.

Waxaad sidoo kale habraaca xallinta khilaafaadka ka bilaabi kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka (Department of Health and Human Services, HHS). Haddii aad doorato inaad isticmaasho habraaca xallinta khilaafaadka, waa inaad bilawdaa habraaca xallinta khilaafaadka 120 maalmood gudahood (qiyaastii 4 bilood) laga bilaabo taariikhda aad heshay biilka asalka ah.

Waxa jira \$25 khidmad ah oo lagaaga qaadayo isticmaalka habraaca xallinta khilaafaadka. Haddii hay'adda isla markaas dib u eegista ku sameynaysa murankaaga ay kugu raacdo, waxaad bixin doontaa qiimaha ku qoran Foomka Qiyaasta Qiimaha. Haddii ay hay'adda kugu raaci weydo/ku khilaafto oo ay ku raacdo daryeel-bixiyaha caafimaadka ama xarunta, waa inaad bixisaa lacagta badan/lacagta biilka.

Si aad wax badan uga ogaato oo aad u hesho foom aad ku bilawdo habraaca, aad [www.cms.gov/nosurprises](http://www.cms.gov/nosurprises) (kaliya lagu heli karo luuqada Ingiriisiga) ama wac Telefoonka Xarunta Wicitaanka ee Bilaashka ah: 1-877-696-6775.

Wixii su'aalo ah ama macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaqa aad u leedahay Foomka Qiyaasta Qiimaha ama habraaca xallinta khilaafaadka, booqo [www.cms.gov/nosurprises](http://www.cms.gov/nosurprises) (kaliya lagu heli karo luuqada Ingiriisiga) ama wac Telefoonka Xarunta Wicitaanka ee Bilaashka ah ah: 1-877-696-6775.

Nuqulka Foomka Qiyaasta Qiimaha ku xafiso meel ammaan ah ama sawir ka qaado. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato haddii lagugu soo dallaco lacag intaas ka badan.

Si aad wax badan uga ogaato oo aad u hesho foom aad ku bilawdo habraaca, aad [www.cms.gov/nosurprises](http://www.cms.gov/nosurprises) (kaliya lagu heli karo luuqada Ingiriisiga) ama wac Telefoonka Xarunta Wicitaanka ee Bilaashka ah: 1-877-696-6775.

Wixii su'aalo ah ama macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaqa aad u leedahay Foomka Qiyaasta Qiimaha ama habraaca xallinta khilaafaadka, booqo [www.cms.gov/nosurprises](http://www.cms.gov/nosurprises) (kaliya lagu heli karo luuqada Ingiriisiga) ama wac Telefoonka Xarunta Wicitaanka ee Bilaashka ah ah: 1-877-696-6775.

Nuqulka Foomka Qiyaasta Qiimaha ku xafiso meel ammaan ah ama sawir ka qaado. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato haddii lagugu soo dallaco lacag intaas ka badan.